ELVERUM KOMMUNE

Elverumskolen - en skole for alle, med blikk for den enkelte!

Go`aan ka soo baxay maamulka
dagmada .06.2012
Wax ka badal maareyn, 09.11.17
Wax ka badelid go`aan ka maamulka dagmada 14.12.17

# GO`AAMO AY SOO SAAAREEN LAANTA DEGMEDA U QAABILSAN ISKUULADA IYO GOOBAHA FIRAAQA EE ELVERUM (JF SHARCIGA AQOONTA § 13-7)

## GOOLKA/HADAFKA

Nidaamka waqtiga firaaqada ee iskuulka (ee lagu magacaabo SFO) waa fursad deqeed loogu talo galay ardayda aada fasalka 1. ilaa iyo ka 4aad. Deeqdu waxa ay ku saamayneysaa amniga, daryeelka iyo dareenka, kuwaas oo kobciya koritaanka iyo horumarka, xiriirka/xidhiidhka dabiiciga ah ee lala yeesho carruurta kale iyo dadka waaweynba.

SFO-ga sidoo kale waa deeq loogu talagalay ardayda leh baahiyo gaar ah laga bilaabo fasalada 5aad-7aad.

Deeqdu/fursadu waa qayb iska ah ikhtiyaari/doorasho oo ka mid ah wax qabadyada dugsiga hoose. Waxay dabooleysaa sidoo kale baahida carruurta ee nasniimada, dhaqdhaqaaqa iyo daryeelka. Deeqdu sidoo kale waxay daboolaysa baahida waalidiinta ee ay kula joogi lahaayeen ilmahooda/carruurta saacadaha ay shaqada ku jiraan sida caadiga ah.

SFO-ga Elverum waa in lagu socodsiiyaa nidaamka qorshaha waxbarashada iyo qorshaha waxqabadka ee SFO-ga.

ELVERUM KOMMUNE

Elverumskolen - en skole for alle, med blikk for den enkelte!

## CAYAARAHA IYO GOOBAHA LOOGU TALOGALAY

Dugsi kastaa wuxuu ku leeyahay gudihiisa hal qol ama in kabadan oo SFO- gu uu isticmaalo inta lagu gudajiro saacadaha ay furan yihiin. Intaa waxaa dheer, in ay jiraan qolal kale oo ay isticmaali karaan dugsiga. Helitaanka qol nasiino oo SFO ah waxay ku salaysantahay baahida uu iskuul walba u qabo taas. Meelaha bannaanka ee dugsiga waa in ay diyaar u ahaadaan adeegsiga/isticmaalka carruurta saacadaha ay furan yihiin SFO-gu. Haddii ay jiraan xaaladaha qaarkood oo ay tahay lagama maarmaan in la xadido isticmaalka dugsiga gudaha iyo dibedda aageedaba, waa in la heli karo ciyaar ku filan iyo fursado firfircoon oo carruurtu ku ciyaari karto goobaha SFO-ga ah.

## DIIWAANGELIN. OGOLAANSHO IYO SHURUUDAHA LAGUUGU OGOLAANAYO

Oggolaanshaha SFO-gu wuxuu ka dhacaa dugsiga aad caadi ahaan ka tirsan tahay. Si aad xaq ugu yeelatid, waa inaad noqotaa arday aada mid ka mid ah fasallada SFO-gu ay khuseyso. Diiwaangelinta waxaa lagu sameeyaa nidaamka maamulka iskuulada ee'Visma,' oo laga heli karo bogga www.elverumskolen.no ama xidhiidh toos ah goobtaan. Waalidku waxay helaan xaqiijin/jawaab ah emayl / SMS in dalabka la helay iyo ogaysiis ah in arjiga loo hawlgaliyay.
Qasab kugu ma aha in aad dalbato sanad walba booska SFO-ga, sii daynta/fasixida booska iyo bedelka meelaynta waxaa lagu sharxay Cutubka 5 hoos ku xusan.

Taariikhda diiwaangalintu waa 1 abriil.
Diiwaangalinta, la soo gudbiyay wixii ka danbeeya 1.abriil, waxa go'aankeeda iska leh maamulaha dugsiga isaga oo eegaya meelaynta boos iyo shaqaale ku filan SFO-da.

## WAKHTIYADA FURIDA IYO FASAXYADA

SFO-gu waxuu caadiyan furan tahay maalin walba oo Isniinta - Jimcaha inta u dhaxaysa 07:00 - 17:00. Dib-u-habeynta gudaha ayaa la sameyn karaa wixii ka baxsan saacadaha furitaanka caadiga ah. Xilliga ay da` yartu dugsiga waxbarashada ku jiraan, SFO-gu way xidhan tahay.

SFO-gu waxuu xidhan yahay:

- 5 maalmood inta lagu gudo jiro sanad gugsiyeedka taas oo ah wakhtiga qorshaynta shaqaalaha
- Ciida masiixiga iyo sanadka cusub
- Arbacada ka horaysa maalinta khamiista ah ee fasaxa booskaha aha inta ka danbaysa 12.00
- Xidhan usbuuca 28,29,30 iyo 31 (afar toddobaad oo buuxa oo ah bisha Juulaay)

Qorshe leh dulmar guud oo ah maalmaha shaqadu xirantahay, ee la qorsheynayo shaqaalaha, waxa warbixitaas lagu soo lifaaqi doonaa warqada boos bixinta.

Inta lagu jiro muddooyin ay jiraan carruur tiro yar oo aada SFO-ga, degmadu waxay awood u leedahay inay isku duweyso howlaha SFO ee u dhexeeya dhowr iskuul. Sidaa darteed, qaar ka mid ah deeqaha/fursadaha uu SFO-gu bixiyo waa la xidhi karaa inta lagu jiro fasaxa dugsiga. Sidoo kale, saacadaha furitaanka waa la beddeli karaa. Tixgal macquul ah waa in la siiyaa baahida carruurta iyo waalidkood.

## LACAG BIXINTA IYO SIIDAYNTA BOOSKA

Marka waalidku aqbalo booska SFO-ga, waalidku waxay ballan qaadayaan inay lacagta booska bixinayaan muddo hal sano ah (shuruudaha lacag bixinta oo ah 11.bilood). Sanadka cusub ee SFO wuxuu bilowdaa 1da Agoosto. Shuruudaha lacag bixinta waxaa la bixinayaa bil kasta 20-keeda.

Sanad walba, golaha deegaanka ayaa dejiya sixirka loogu talo galay lacag la bixinayo. Heerarka lacag bixinta ayaa sida caadiga ah la isku hagaajiyaa inta u dhaxaysa laba sano ku dhawaad waxayna dhaqangelayaan 1da Agoosto.

Muddada Ogoosto - Abriil SFO-ga ayaad siidayn/fasixi kartaa booska adigoo siinaya digniin ogeysiis dhamaadka 30ka bisha. Bil kasta oo 1da- Abriil kadanbaysa, booska lama siidayn/fasixi karo. Marka aad rabto in aad booska siidayso/fasaxdo, waa inaad gasho Visma Flyt School adoo isticmaalaya aqoonisigaaga ID-porten.

Qiimaha oo buuxa waa in la bixiyaa booska aan la isticmaalin oo aan la siidayn/fasixin . Ka dhaafitaanka lacag-bixinta waxaa lagu dabaqi karaa haddii cunugga uuna awoodin inuu istcimaalo booska SFO-ga bil ama ka badan cudur dartiis. Caddayn caafimaad ayaa shardi ah in la soo gudbiyo.

Haddii, ganaax lacag bixin ay jirto, oo ay kugu hadhay laba bilood lacag bixinteedu, xuquuqda iyo booska nidaamka firaaqada dugsiga waa lagaa saari karaa isla markiiba. Lacag bixintu marka ay wakhtigeedii dhaafo, waxaa jiraya sixir dulsaar ah oo ay dejiso lixdii biloodba mar Wasaaradda Maaliyaddu. Waxaa kale oo jira ganaaxyo iyo sidoo kale lacag dulsaar ah.

ELVERUM KOMMUNE

Elverumskolen - en skole for alle, med blikk for den enkelte!

## SHAQAALAHA IYO MAAMULKA

SFO-gu waa qayb ka mid ah nashaadaadka dugsiga, waxuuna hoos timaadaa madaxa maamulaha dugsiga. SFO kasta waxa uu mudan yahay doorbidid inuu yeesho hogaamiye waaxeed aqoon yahan leh takhasuska ilmaha/caruurta oo mas'uul ka ah hawl-maalmeedka. Tani waa waxa miisaanka la saaro marka masuuliyadaan qof loo shaqaalaysiinayo.

Shaqaalaha aasaasiga ah ee SFO-ga ee Elverum waxay ku xirantahay tirada carruurta iyo baaxadda adeegyada. Shaqaaleynta SFO kasta waa la xoojin karaa sababtoo ah carruurta leh baahiyo gaar ah oo daryeel iyo kormeer.

## CAYMIS

Caruurta ku jirta SFO-gu waxay ku jiraan caymis iyadoo la raacayo xeerarka caymiska ee lagu dabaqi karo ardayda dhigata dugsiga hoose ee Elverum.

## MAARAYNTA CUNTADA

SFO-ga carruurtu waxa uu helaa deeq cunto kala duwan ah. Waxa badanaa ahmiyada la saaraa inay noqoto cuntadu cunno nafaqo leh. Maalin kasta, ugu yaraan hal wakhti ayaa si wada jir ah hal wakhti wax loo wada cunaa intaana waxa u sii dheer khudaarta.

## LOO DOORTAHA IYO MATALAHA

Dugsihoose oo kasta waxaa ku leeyhay guddi hawleed. Agaasinka Guddigu waxay xaq u leeyihiin inay ka faalloodaan dhammaan arrimaha khuseeya SFO-ga. Qaabdhismeedka Agaasinka Guddiga waxaa lagu sheegay sharciga waxbarashada, -§ 11-1. Iskuulku waxa uu ugu yeedhi karaa waalidiinta shir u gooni ah oo u khaas ah SFO-ga.

## OGAYSIIN XAALADAHA CAAFIMAAD

Waalidku waxay mas'uul ka yihiin inay u sheegaan duruufaha gaarka ah ee la xidhiidha caafimaadka ilmaha oo saamayn ku yeelan kara joogista ilmuhu joogo SFO-ga.